

Xaashida Xaqiiqda Gudniinka Fircooniga ah ama Jarjarinta (FGM/C)

Maraykanka waxa ka go'an soo afjarinta gudniinka fircooniga ah ama jarjarinta (FGM/C). Haddii aad rumaysan tahay inaad halis ugu jirto FGM/C, aad ogtahay qof halis ugu jirta FGM/C, aad su'aal ka qabto FGM/C, ama aad martay FGM/C una baahan tahay caawimo ama macluumaad dheeraad ah, fadlan la xidhiidh lambarka hoose.

Waa Maxay FGM/C?

FGM/C waxa loo tixraacaa jarjarista iyo hababka kale ee lagu dhaawaco xubnaha taranka gabadha iyada ooyna jirin sabab caafimaad oo kallifaya. Waxa loogu yeedhi karaa "gudniinka gabdhaha" qaybo adduunka ah. Hawshan ma leh faa'idooyin caafimaad waxayna horseedi kartaa dhibaatooyin jidheed iyo maskaxeed.

Waa Maxay Saamaynaha Caafimaad ee FGM/C?

Saamaynaha yimaada isla markaaba waxa kamid noqon kara dhiig-bax, xanuun daan, iyo mararka qaar dhimasho. Dhibaatooyinka caafimaad ee muddada fog waxa kamid noqon kara infakshanada kaadi-mareenka, isku-furan, dhalmo la'aan, iyo xanuunka caadada ama galmada, korodh suurogal ah ee halista infakshanka HIV/AIDS. Sidoo kale, haweenka lagu sameeyey FGM/C waxay si aad ugu dhaw yihiin inay la kulmaan caqabado xilliga dhalmada carruurtooduna waxay aad ugu dhaw yihiin inay dhintaan hawshan darteed. Ugu dambayn, hawshan waxay sida badan baddaa gabdhaha iyo haweenka inay cabsi dareemaan, nafsi ahaan cabsadaan, yaxyaxaan, oo walaacaan.

Waa Maxay Aragtida Dawladda Maraykanka ee FGM/C?

Dawladda Maraykanku way ka soo horjeedaa FGM/C, iyadoon la eegin nooca, heerka, ama dhibta leeyahay, iyo iyadoon la eegin waxa dhiirigalinaya in la sameeyo. Dawladda Maraykanku waxay fahamsan tahay in FGM/C ay dhici karto in loo sameeyo iyada oo la raacayo rumaysnaan caado iyo kaqayb ahaan xafladaha qaangaarista. Haddana, Dawladda Maraykanku waxay u tixgalisaa FGM/C inuu yahay gabboodfal xuquuqda aadanaha oo halis ah, iyo qaab kamid ah xadgudubka jinsiga kusalaysan iyo gabboodfalka ilmaha.

Maxay Dawladda Maraykanku u Bixinaynaa Ogaysiiskan FGM/C?

Maraykanka waxa ka go'an soo afjarista FGM/C si loo ilaaliyo caafimaadka iyo fayooabaanta, iyo horumarka xuquuqda, haweenka iyo gabdhaha adduunka oo dhan. Maraykanku wuxuu ka shaqaynayaa gudaha iyo waddamada si uu u caawiyo waxbarista dadka ee halista, saamaynaha dhaawac ee FGM/C ee haweenka iyo gabdhaha.

Waa Maxay Dambiga ka Dhalanaya ee Samaynta ama Kaalmaynta FGM/C?

Wuxuu ka soo horjeedaa sharciga Maraykanka in lagu sameeyo FGM/C gabadh ka yar da'da 18 jir, ama in loo diro ama la isku dayo in loo diro dibadda Maraykanka si FGM/C loogu sameeyo. Jabinta sharcigu waxay ciqaabtiisu tahay 5 sano oo xadhig ah, ganaaxyo, ama labadaba. Ma jiro wax ka reeban samaynta FGM/C ha noqoto caado ama dhaqan. Jarjarista ama hababka kale ee dhaawacaya xubnaha taranka ee gabdhaha ee gabadh kayar 18 jir waa mamnuuc sharciga Maraykanka.

Waa Maxay Waxa ka Dhalanaya Socdaalka Jabinta Shuruucda Kasoo Horjeeda FGM/C?

Jabinta shuruucda ka soo horjeeda FGM/C – xiitaa haddii ayna jirin dambi lagu xukumay – waxay yeelan kartaa cawaaqibyo socdaal oo muhiim ah, oo ay kujiraan ka dhigista qof in aan la oggolaan Karin ama laga saari Karin Maraykanka, iyo sidoo kale aan mutaysan Karin dheefaha socdaalka qaarkood.

Miyey Haweenka Maray FGM/C Jabiyeen Shuruucda?

Gabadha ama haweenayda martay FGM/C may khaldamin. May jabin shuruucda Maraykanka habka ay martay darteed. Mutaysiga u socdaalka ama mutaysiga dheefaha socdaalka ee Maraykanka si taban uma saameeyaan xaqiiqda in qof uu maray FGM/C.

Halkee Qofku Ka Heli Karaa Khayraad Dheeraad Ah?

Haddii aad rumaysan tahay inaad halis ugu jirto FGM/C ama aad martay FGM/C, aad su'aal ka qabto FGM/C, aad hayso macluumaad kusaabsan qof ka samaynaya FGM/C Maraykanka dhexdiisa, ama aad ogtahay qof halis ugu jirta kara in FGM/C lagu sameeyo halkan ama dibadda Maraykanka, fadlan la xidhiidh lambarkan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan khayraadka jira: **1-800-994-9662**